

Ku dhawaaqayaa A.F.I.S.

JAMHUURIYADDA TALYAAANIGA

Maamulka Wasaadda Talyaaniga ee Soomaaliya

Wuxuu Caddaynayaa in loo xilsaaray Maamulka Wasaayadda.

SHACABKA SOOMAALIYEED

Qaramada Midoobay waxay u xilsaartay Dawladda Talyaaniga Maamulka Wasaayada muddo ah toban sano, xilka gobanimo gaarsiinta dadka soomalida in ay ku caawiyaan wanaagga iyo horumarinta.

Si waafaqsan go'aamadaas iyo heshiisyada dhexmaray Masuulinta dawladdaha Ingriiska iyo Talyaaniga, laga bilaabo maantay, waxaa loo xilsaaray Maamulka dalka, iyado la ballanaadayo ku dhaqanka si waafaqsan mabaadiida iyo ulajeedooyinka Qaramada Midoobay.

Xuquqda aadanaha iyo xorriyadaha asaasiga, si wafaqsan mabadiida Dastuurka iyo xeerarka Dawladda Jamhuuriyadda Talyaaniga waa kuwo la ballan qaaday, sidoo kale in loo simanyahay xeerarka, iyadoo aan lagu kala soocin qolada, jinsiga lab/ dheddig, luqadda, fikradda siyaasadda iyo diinta.

Illaa laga soo saarayo xeerar cusub, waxaa lagu dhaqayaa dalka xeerarkii jira wixii la jaanqaadi kara Mabadiida Maamulka

SHACABKA SOMAALIA

Anigoo ku hadlaya magaca Dawladda Taayaaniga oo aan wakiil ka ahay waxaan idii soo jeedinayaa salaam diiran, anigoo hubo kuna tashanaya wadashaqayntiina daacadda iyo wax ku oolka ah ee dhammaantiin si aan u guto waajibaadka laygu aaminay, ee ku waajahan wanaaggiina iyo dalkiina.

Muqdiisho, 1 Abril 1950.

Gorini